# 1 KU SAABSAN KULLIYADA IYO KULLIYADA: KULLIYADA & MIHNADA ISKU XIDHKA

Shakhsiyaadka sida digriiga **kulliyada** **waxay shaqaystaan $1 milyan wax ka badan noloshooda oo dhan** marka la barbar dhigo kuwan sita dibloomada dugsiga sare. (Khan Academy, 2014).

## WAXA WAXBARASHADDA AY U QABTO **RIYADAYDA SHAQO AY U BAAHANTAHAY?**

Waxaad kala dooran kartaa boqolaal ah **shahaadooyin sare** iyo **shahaadooyinka**. Caadi ahaan, badanku waxay ukala baxaan laba qaybood: **farshaxanka** ama **shaqadu ugu soo horayn karto.**

## **FARSHAHANKA** SHAHAADOOYINKA SARE

oo ay kamid yihiin suugaanta, falsafada, taariikhda iyo lkuqaddaha. Shahaadooyinkan sare way ka ballaadhanyihiin oo waxay keeni karaan shaqooyin kala duwan oo aan u baahnayn aqoon gaar ah ama farsamo.

**Ingriiisiga** – tafatiraha, fuliyaha suuq gaynta, qoraaga

**Luqadda ajnabiga ah** – sarkaalka adeega ajbaniga, turjubaan, macalin

**Cilmiga siyaasada** – abaabulaha bulshadda ama qofka bulshadda u dhaqdhaqaaqa, qareenka, baadhaha siyaasada

**Cilmi nafsiga** – cilmi baadhaha suuqa, shaqaalaha bulshadda, la taliyaha caafimaadka maskaxda

## **KUWA SHAQADU UGU SOO HORAYN KARTO EE** SHAHAADADAHA SARE IYO SHAHAADOOYINKA

kaas oo xooga saara horumarinta xirfado gaar ah iyo aqoonta wixii ah **mihnadaha gaarka ah**

- Bay'olajiga bada
- Fanka wax karina
- Daraasadaha sharciga
- Injineernimada
- Sixada ilkaha
- Qurxinta wejiga

## **MA GARANAYSID** WAXAAD DOONAYSO INAAD WELI SAMAYSO?

**1 Ka feker danahaaga.**

**Qor fikradaha shaqada** iyo xiisaha oo ka dib cilmi baadhid ku samee sida ay ugu xidhmi karaan shaqo.

**Booqo** careerbridge.wa.gov si aad u sahamiso mihnadaha.

**2 Go'aan ka gaadh sida loogu qalmo shaqooyinka kala duwan.**

**Baro shuruudaha shaqada** (xirfadaha, fasalada, digriiyada gaarka ah ama tababarka, iwm.)

**La hadal la taliyaha mihnada,** macalinka ama xubinta qoyska.

**3 Ka hel khibrad.**

Mutadawic noqo, hel **tababarka shaqo** ama **bixinta khibrada shaqo**.

## SAMEE **CILMI BAADHID:**

Cilmi baadhid ku samee kulliyadaha kala duwan si aad u fahanto kuwa bixiya barnaamijka shahaadada, ta sare ama/iyo digriiga aad u baahantahay mihnadeeda. Waxa aad doorataa waxa uu saamayn doonaa inta ay tahay lacagta aad shaqaysataa.

**MAARSO:** FASALKA 9 iyo 10